

IRS1

Sidee loo weydiistaa Dib u eegid Madax Bannaan

Xuquuqda aad u leedahay dib u eegid madax bannaan

Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato dib u eegid madax bannaan oo lagu sameeyo deeqda daryeelka mujtamacaaga, deynta qalalaasaha, deynta miisaaniyadeynta ama go'aanka lacagta siyaadada ah ee la isa siiyey haddii:

- Aad haysatay go'aan ku saabsan codsiga Maalgelinta Bulsheed; iyo
- In go'aanka uu marka kale eego Sarkaal Dib u eegid; iyo
- Inaad weli ku qancin asagaas.

Dib u eegidda Kormeeraha

- Qaabka dib u eegidda madaxa bannaan waa mid sahlan oo deg deg ah.
- Qaabka oo dhan waa inuu qaataa waxaan ka badneyn 12 maalmood oo maalmaha shaqada ah ama 24 saacadood oo loogu talagalay deynaha qalalaasaha deg degta ah.
- Kormeeruhu wuxuu beddeli doonaa go'aankaagu haddii uu qaldaanaa; ama wuu xaqiijin doonaa haddii uu sax ahaa; ama xaalado dhif ah wuxuu weydiin doonaa Sarkaalka Dib u eegidda inuu mar kale eego arrinkaaga.

Sidee loo weydiistaa dib u eegid ay sameeyso Adeegga Dib u eegidda Madaxa Bannaan (Independent Review Service)

- 1 Buuxi qaybta la jeexayo ee warqaddaan qoran ama qor warqad aad ku weydiisaneyso dib u eegid madax bannaan.
- 2 Qaybta la jeexday ama warqadda aad qortay ku soo celi xafiiska Xarunta Shaqada lagu Daray (Jobcentre Plus office) ee go'aanka dib u eegidda ka gaartay codsigaaga.
- 3 Xafiisku wuxuu dhammaan warqadaha hawshaada u diri doonaa Adeegga Dib u eegidda Madaxa Bannaan, kaasoo ka dibna warqad ku saabsan arrinkaaga kuu soo qori doona.

Haddii maqalku kugu culus yahay, araggaagu daciif yahay ama haddii Ingiriisku uusan ahayn luqaddaada koowaad, waxaan ku siin karnaa adeeg kuu beddela si aan kaaga caawinno inaad baahiyahaaga wax ka qabatid. Fadlan na weydii wixii faah faahinno ah.

IRS 1 (APP)

Foomka Codsiga

Qaybta A – Faah faahinta shakhsi ahaaneed

Magacaaga oo buuxa

Lambarka Caymiska Qaranka

Cinwaan

Summadda Boostada

Lambarka Telefoonka.

Qaybta B – Maxay tahay sababta aad u dooneysid dib u eegiddu?

Fadlan isticmaal meesha hoose ee bannaan si aad Kormeeraha u ogeysiisid sababta aad go'aanka ugu khilaafsan tahay Sarkaalka Dib u eegidda.

Foomka Codsiga (wuu sii socdaa)

Qaybta C – Miyaad leedahay qof ku matala?

Ma leedahay qof ku matala kaasoo wax ka qaban doona arrinkaaga asagoo wakiil kaa ah?
(faldan hal sanduuq xarriiq)

Maya Kormeeruhu warqadaha hawsha arrinkaaga adiga ayuu kuu soo diri doonaa.

Haa Kormeeruhu warqadaha hawsha arrinkaaga wuxuu u diri doonaa qofka ku matalaya.
Fadlan hoos ku qor faah faahinta meesha lagala xiriirayo:

Magaca qofka ku matalaya

Cinwaanka qofka ku matalaya

Summadda Boostada
Lambarka telefoonka qofka ku matalaya

Qaybta D – Saxiixaaga

Saxiixaaga

Taariikh

Hadda foomkaan waxaad u dirtaa xafiiskii dib u eegidda arrinkaaga lagu sameeyey